4

Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada

SOM 004/**2010**

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Dumarka Kanada degan waxay ku noolyihiin maalinkasta nolol rabsho badan. Rabshadaha ay la kulmaan waxaa ka mid ah ku xadgudub dil ah, galmo ah, niyad jabin, iyo dhaqaale xumo. Sababta keenta ku xadgudubka waxay tahay xadgudbaha oo raba in uu xukunka iyo awooda asaga gacanta ku dhigo oo ku amar taagleeyo qofka kale. Adiga dambi kuma lihid haddii lagugu xadgudbo. Adiga ma aadan doonan xadgudubka.

Waa kuwee noocyada xadgudubka sharci darrada ah?

Kanada gudaheeda, noocyo badan oo xadgudub ah ayaa dambi ah. Xadgudubyada badanaa dhaca waxaa ka mid ah:

Dabagal lagugu sameeyo si laguu cabsiiyo. In lagu dabagalo waa dambi xitaa haddii uu ruuxaasi ku dabagalay wax dhib ah kuu geysan. *Xeerka dambiyada* ee Kanada u degsan wuxuu falkan dabagalka ah ku magacaabaa **cadaadis dambi ah (criminal harassment)**. Dambigan dabagalka ah waxaa ka mid ah marka uu qof:

- ku eegto kaddibna ku soo dabagala
- kuu soo diro haddiyad aadan raali ka ahayn
- bur-buriyo hantidaada
- isku dayo in uu kula xiriiro adiga oo aanan raali ka ahayn
- kuu soo diro fartiimo badan oo aadan raali ka ahayn asagoo emailka ama fartiin qaadaha kuugu soo gudbinaayo
- isku dayo in uu si toos ah kuula xiriiro ama farriin kuugu soo faro dad kale
- cabsi geliyo adiga ama reerkaada
- ku sameeya qadka combiuuterka inta kor ku xusan oo idil

Haddii lagu soo dabagalo, meel ku qor wixii dhacay oo idil iyo waxa aad ka ogtahay ruuxa ku dabagalay. Qoraalkan xusuusta ah wuxuu kaa caawini doonaa in aad si sahlan u qanciso boliiska iyo qaaligaba si dambi loogu xukumo ruuxan dabagalka sameeyey.

Dagaal waa marka uu qof qof kale ku boodo. Dagaalka waa dambi, xitaa haddii aan dhaawac laguu geysan. Dagaal waxaa ka mid ah:

- af-xumo iyo hanjabaad laguu geysto
- dharbaaxyo
- kala tuurid
- haraati
- feer
- tooriyeen

Faraxumeyn waa marka laguu galmoodo ama lagu taa-taabto adiga oo aan raali ahayn. Kanada gudaheeda, saygaada wuxuu sameeyey xadgudub galmo hadii uu kuu galmoodo adiga oo aan raali ahayn waana dambiile. Ku xadgudub galmo waa dambi, xitaa haddii aan dhibaato laguu geysan. Ku xadgudub galmo waxaa ka mid ah:

- shumis aadan raali ka ahayn
- taa-taabasho
- galmo xoog leh
- kugu qasbo in aad ogolaato arrimaha kor ku xusan ama galmo nooc kale ah asagoo isticmaalayo hanjabaad ah in dhibaato ay kugu dhici doonto adiga ama ruux aad ka gubaneysid haddii aadan qaadan amarka

Haddii lagu dabagalay, lagula dagaalamay, ama lagu faraxumeeyey, **waxaad xaq u leedahay in aad wacato boliiska**.

Boliiska Kanada, marka ay baaraan kuna cadaato saygaada in uu ku farxumeeyey, dambi ayey ku soo oogi doonaan xitaa haddii adiga aadan raali ka ahayn. Dumarka xitaa waa lagu soo oogaa dambigan ku xadgudubka ah kolka uu saygooda soo dacweeyo.

Waa in la fahmaa in xadgudubka niyad jabinta ah uusan Kanada dambi ka ahayn.

Sidee ayuu sharciga kuu caawinayaa

Haddii lagu dabagalay, lagula dagaalamay ama lagu faraxumeeyey waxaad sameyn kartaa dhowr waxyaabood mid kood. Arrimahaasi kuwo sahlan ma ahan mana la hubo in ay waxtar leeyihiin. Marka ugu horeyso waa in aad nafsaddaada iyo tan caruurtaada aad nabad gelyeysaa. Mar alla marka aad kala tagtaan seygaada adiga iyo caruurtaadaba halis ayaad ku jirtaan. Haddii aad ku talo jirto in aad isaga tagto sayga ama saaxibka ku dhibaateeyey, waxaa jira tallaabooyin haboon aad ku dhaqaaqi karti oo aad ku bad baadi kartid. Saddexdan shey ayuu sharciga kaa caawini karaa:

1. In Awooda Maamulka Qoyska lagugu soo Wareejiyo

Haddii laguu hanjabay ama lagugu xadgudbay, maxkamadda xeerka qoyska ayaad weydiisan kartaa in **lagaa fogeeyo** qofka ama **awooda maamulka guriga kaligaa lagugu soo wareejiyo**.

Kala fogeynta

Waxaad codsan kartaa amarka ah in lagaa fogeeyo ruuxa ku dhibaateeyey. Ka fogeynta waxay quseyn kartaa saygaada, adiga iyo ruuxa aad isla nooshihiin, saygaadii hore, ama ruuxii aad isla wada nooleydeyn xitaa haddii ay ahayd muddo gaaban. Kala fogeynta waxay xad u yeeleysaa wixii dhici lahaa. Amarkan wuxuu faryaa ruuxa xadgudbaha ah in uusan la soo xiriirin adiga ama reerkaada, ama uusan xitaa isku dayin in uu kula soo xiriiro. Wuxuu amarkan fari karaa ruuxa ku dhibaateeyey in uu kaa fogaado, wuxuu kaloo qeexi karaa inta uu kuu jirsan karo mar kasta. Amarkan wuxuu kaloo fari karaa in uusan qofkaa haysan karin wax hub ah ama hub ahaan loo isticmaali karo.

Intee ayey qaadan karaa helidda amarkan maxkamadda ka soo baxa?

Bacdamaa ay maxkamadda xeerka qoyska aad u mashquul santahay, helidda amarkan kala fogeynta ah wuxuu qaadan karaa dhowr bilood. Haddii uu qaaliga u arko in cabsi dhab ah aad qabtid, wuxuu amrayaa xadgudbaha in uu kaa fogaado. Amarkan wuxuu yeelan karaa muddo go’an ama muddo aan go’neyn hadba sida ay xaaladda tahay.

Xaalad deg deg ah marka ay timaado maxaad qaban kartaa

Haddii adiga ama caruurtaada ay halis idin soo food saarto, waxaad codsan kartaa amarka ah "*ex parte* basis". Taa macnaheeda waxay tahay, waxaad weydisaneysaa qaaliga in amarka kala fogeynta uu kuu ogolaado iyada oo aan wax la wareysan ruuxa kale. Amarkan in la helo wuu dhib badan yahay, haddii la helana wuxuu soconayaa muddo gaaban.

Maxaa dhacayo haddii xadgudbaha uusan fulinin amarka la siiyey?

Ruuxa ku dhibaateeyey haddii uu fulin waayo amarka fogeynta oo aad rabtid in dambi lagu oogo, waa in aad boliiska u soo dacwooto. Boliiska wuu baarayaa eedeyntaada. Ruuxa dhibaateeyaha ah oo amarka ka fogaashaha jebiya waxaa lagu oogi karaa dambi weyn. Macnaha wuxuu yahay waa la soo xiri karaa, boliiska wuu eedeyn karaa waana la xabisi karaa inta damiin laga damiinanaayo. Haddii uu dambiga ku cadaado, xabiska weyn ayaa loo dhaadhicin karaa ama in la koontroolo ayaa lagu xukumi karaa. Haddii aad rabtid xog warran dheeraad ah oo ku aadan ruuxa ku dhibaateeyey damiinashadiisa halkan hoose ka fiiri.

La wareegidda maamulka guriga

Haddii aad si sharci ah isu qabtaan saygaada, maxkamadda xeerka qoyska ayaad ka codsan kartaa in **lagugu soo wareejiyo awooda maamulka guriga.** Taasi macnaheeda waxay ka dhigantahay saygaada ma imaan karo agalka aad leedihiin ama idiin kireysanba, waadna ka bedeli kartaa qufulka. Haddii aad kireyste tahay, inta aadan qufulka bedelin kala hadal oo fasax weydiiso ruuxa iska leh guriga.

Dumarka guur la'aan kula nool saygooda, way ku adag tahay in ay helaan amarka la wareegidda maamulka guriga. Si deg deg ah u raadso ruux qareen ah si uu talo kuu siiyo. Soo ogow in furaha aad haysan karto keligaa.

Amarka la wareegidda maamulka guriga macnahiisa ma ahan in uu ruuxa kale luminaayo xaqiisa gaarka u ah.- xadgudbaha inkasta oo uusan imaan karin aqalka, haddana xaq ayuu ku leeyahay hantida guriga oo wuu weydiisan karaa qeybtiisa.

2. Waa in aad la socotaa Shruudaha lagu soo deeyey xadgudbaha

Haddii ruuxa kugu xadgudbay lagu eedeeyo falkaah dabagal, dagaal ama faraxumeyn, boliiska wuu sii dayn karaa ama wuu maxbuusi karaa inta laga soo taagayo maxkamadda damiinashada loogu codsanaayo. Maxkamaddan damiinashada lagu codsanaayo waxay go'aamineysaa in damiin lagu sii deeyo ruuxan ama in xabiska lagu sii hayo inta laga gaarayo dhageysiga dacwaddiisa. Maxkamadda haddii ay ogolaato **damaanadda**, ruuxan waa la soo deynayaa.

Badanaa dadka xadgudbeyaasha ah oo damaanad lagu sii deeyowaxaa lagu amraa in ay raacaan shuruudo adag. Kuwaas waxaa lagu magacaabaa **shuruudaha siidaynta**, ama shuruudaha damaanadda. Haddii ruuxa xadgudbaha ah ay boliiska siidaayaan waxay mar kasta ku sii daayaan shuruud. Shuruudaha sii deynta waxaa badanaa ka mid ah in xadgudbaha uu ka fogaado dhibbanaha aga-gaarkiisa. Shuruudahan waxay badanaa leeyihiin:

- qofka waa in uu aqalka joogaa waqtiyada qaarkood
- waa in uusan cabin khamri ama isticmaalin droogo
- waa in uusan gadan ama haysan hub
- waa in uu ku noolaado meel la ogyahay
- waa in uu si joogta ah ula xiriiraa boliiska
- wuxuu arki karaa caruurtiisa kolka ay maxkamadda u amarto oo keli ah

Intee ayey soconeyaan shuruudahan sii deynta damaanadda ah?
Badanaa, maxkamadda ma nasakhdo amarka ku aadan fulinta shuruudahan ilaa uu dhageysiga maxkamadda idlaado ama la wada xalliyo eedeynta dambiyda ruuxaas oo idil. Mararka qaarkood, maxkamadda wax bay ka beddeli kartaa shuruudaha xitaa haddii uusan dhamaan dhageysiga dacwadda. Qodobka ah ka fogaanshaha ruuxa kale haddii uu ku jiro shuruudaha, maxkamadda ma bedeleyso qodobkaas adiga oo aanan raali ka ahayn.

Maxaa dhacayo haddii shuruudaha sii dayntan iyo amarkii hore ee xeerka qoyska ay is khilaafsanyihiin?
Xeerka qoyska wuxuu amri karaa in waalidkan xadgudbaha ah uu xaq u leeyahay in uu caruurtiisa waqti u helo, laakiin waxaa haddana dhici kara kolka lagu soo eedeeyo in uu kula dagaalamay in maxkamadda ay ku soo dayso shardi ah in uu ka fogaado caruurta iyo adigaba. Haddii arrintan oo kale ay dhaco way kugu adkaaneysaa sida aad wax yeeli lahayad. Sida ugu dhaqsiyaha badan raadso **qareen taladiisa**. La socodsii qaaliga iyo Qareenka Dowladda u doodaba amarkii hore ee ka soo baxay maxkamadda xeerka qoyska.

Yaa ilaalinaayo ruuxa xadgudbaha ah?

Maxkamadda waxaa laga yaabaa in ay go'aan ka gaarto ruuxa ilaalin lahaa ruuxa xadgudbaha ah. Qofkan wax ilaalinayo waxaa lagu magacaabaa **damiinte**. Damiintaha waxaa laga yaabaa in uu dhigo lacag dabaaji ah si loo sii daayo xadgudbaha. Damiintaha waa in uu soo sheegaa haddii uu ruuxan ku xadgudbo shuruuda lagu sii daayey. Haddii ruuxan uu ku xadgudbo shuruuda lagu sii daayey waa in aad la socod siisaa boliiska ee ma ahan in aad la socod siiso ruuxa damiintaha ah.

Maxaa dhacayo haddii xadgudbaha uu fulin waayo amarka?

Haddii xadgudbaha uu fulin waayo shuruudaha lagu sii daayey, waxaa lagu eedeyn karaa dambi kale. Dambigan cusub wuxuu sii kordhinayaa kuwii hore.

Haddii ruuxan uu si joogta ah u jabiyo awaamiirta shuruudiisa, maxkamadda way ka qaadeysaa xornimadiisa. Sidaa haddii ay dhacdo xabiska ayaa lagu celinayaa ilaa la gaaro waqtiga dacwaddiisa. Maxkamadda waxaa laga yaabaa in ay xabiska ku sii hayso haddii ay dareento in uu ruuxaasi halis galin karo nafsaddaada, sida asagoo soo iibsaday hub.

3. Nabadgelyo weydiiso

Haddii lagula dagaalamay ama lagu handaday, waxaad weydiisan kartaa in **nabadgelyo lagu siiyo**. Waad weydiisan kartaa nabadgelyo in lagu siiyo xitaa haddii la burburiyo ama lagu hanjabo in laburburindoono hantidaada. Amarkan nabadgelyo siismada ah wuxuu farayaa in xadgudbaha uu muddo hal sano ah ka fogaado adiga, reerkaada iyo hantidaadaba. Amarkan nabadgelyo siismada ah ma ahan xukun dambi la geystay ah, laakiin haddii la jabiyo dambi weyn ayuu noqonayaa.

Goormee la weydiistaa amarkan nabadgelyo siismada ah

Amarkan nabadgelyo siismada ah wuxuu fiicanyahay marka aadan rabin in arrinta ay boliiska faraha la galaan, ama marka boliiska aad u sheegto xadgudubka lagugu sameeyey oo ay wax ka qaban waayeen.

Sidee loo weydiistaa amarka nabadgelyo siinta ah

Si aad u hesho amarka nabadgelyo siinta ah waa in aad ka codsataa **Qaaliga Maxkamadda**. Waa in aad ku dhaarataa in aad runta ka sheegtay arrinta jirta, una sheegtaa qaaliga sababta aad uga cabsaneysid xadgudbaha. Qaaliga wuxuu codsigaada la socod siinayaa ruuxa xadgudbaha ah. Ruuxa kugu xadgudbay maxkamadda horteeda ayuu tagi karaa wuuna beenin karaa dacwaddaada. Qaaliga wuu idinka dacwo qaadayaa kaddibna go'aan ayuu ka gaari karaa arrinta. Waxaa dhici kara:

- Haddii qaaliga uu garawsado in ay run tahay cabsidaada, wuxuu ka saxiixayaa xadgudbaha in uu nabadgelyo ku siiyo. Amarkan wuxuu farayaa xadgudbaha in uu muddo hal sano ah ka fogaado adiga, reerkaada iyo hantidaadaba.
- Haddii qaaliga uu garan waayo cidda labadiina runta sheegeyso,ama ay la noqoto in eeda labadiinaba aad wada leedihiin, wuu burinayaa codsigaadii. Ama wuxuu amri karaa nabadgelyo in aad is wada siisaan. Taa macnaheeda waxay tahay in labadiinaba aad kala fogaataan oo is nabadgelisaan. Waa in aad saxiixdaa amarkan aadna u fulisaa sida uu yahay.

Ka foojignaan. Inta aadan saxiixin heshiiskan is nabadgelyeynta ah latasho ruux qareen ah. Xadgudbeyaasha qaar ka mid ah ayaa si xun u isticmaala heshiiskan is nabadgelyeynta ah. Waxaa dhici kara, in uu kaa dhaa-dhiciyo in aad meel isku wada aragtaan kaddibna uu boliiska kuu waco oo uu kugu eedeeyo amar diido.

Waad weydiisan kartaa qaaliga in heshiiskan nabadgelyo siinta ah laguugu daro qodob muhim kuu ah. Sida, in ruuxa xadgudbaha ah uusan imaan aga-gaarka xarunta shaqadaada.

Mar alla marka la kala saxiixdo heshiiskan waa in aad ka **diwaan gelisaa Xarunta Warbixinta Boliiska Kanada CPIC** (Canadian Police Information Centre). Kooxda boliiska waa in ay marka hore fiiriyaan liiska CPIC inta aysan ka jawaabin codsiga ka yimid reerka is laayey.

Maxaa dhacayo haddii xadgudbaha uu fulin waayo amarka?

Wac boliiska, haddii xadgudbaha uu fulin waayo heshiiska is nabadgelyeynta ah. U sheeg in sababta aad u soo waceysid ay tahay in aad ka warbixiso **amar diidada lagu sameeyey heshiiska is nabadgelyeynta ah**. Boliiska ma ku oogi karaan dambi ruuxa xadgudbaha ah haddii aysan arrinta horey u diwaangelisneen. Sidaas darted ayey muhim u tahay in marka hore heshiiska laga diwaan geliyo Xarunta Warbixinta Boliiska Kanada CPIC.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. **Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)**
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par : Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.